



Maarso 25, 2020

## **Xaashida Xaqiiqada ah: COVID19 Xarunta Qiimaynta/Xarunta Soo-kabashada**

### **Tilmaanta Aasaasiga ah**

- Xarun weyn oo urursan looguna talagalay in lagu bixiyo daryeel caafimaad, waa mid la kormeero oo loogu talagalay dadka waaweyn oo leh astaamaha COVID ama baarista togan. Dadkaas oo aan awoodin in ay raacaan tilmaamaha caafimaadka bulshada ee ka midyahiin go'doominta, karantiilinta, ama guriga oo cudurka laga soo kabto, sababtuna ay ahaan karto hoy la'aan.
- Xarumaha AC iyo RC waxay bedeli karaan boosaska cisbitaalada, taasoo suurta gelineysa in kiisaska COVID aan halista aheyn loosoo diro xaruumaha AC / RC, Istaraatiijiyadaan ayaa waxay furi doontaa sariiraha cisbitaalka xaaladaha degdegga ah.
- Shaqaale iyo agab yar awgeed, King County waxay raadineysaa inay Gobolka oo dhan ka dhisto dhowr goobood oo waaween, halkii ay ka isticmaali lahayd goobo badan oo yaryar.

### **Fikrado**

- Dadweynaha: Dadka waaweyn oo aan awoodin inay is go'doomiyaan, karantiilaan, ama guryahooda cudurka kaga soo kabtaan. Waxaa ka mid noqon kara dadka safarka ah, kuwa qaba astaamaha COVID19 ama natiijo togan leh, qofka caafimaad ahaan tabar yar, ama gurigoode ee dagan yahiin dad nugul ( sida qof weyn, ilmo difaaca jirka u ku yaryahay, haween
- Cabbirka: Waa mid Isbadali kara, ilaa 350 qof goobtiiba.
- Shaqaalaha: Illaa 80 shaqaale goob kasta, oo ay ku jiraan shaqaalaha caafimaad ka iyo kuwa aan xirfad caafimaad laheyn. ayadoo ay ku xirantahay cabirka xarunta, waxaan qiyaasena in goob kasta lahaan doonto agaasime goob iyo dhakhtar, iyo ilaa sedex shaqaale oo amniga markasta ilaaliyo, shaqaalahaas oo kormeeraya gudaha iyo dibada. Cunno ayaa la siin doonaa dhammaan martida
- Gaadiidka: Gaadiidka tagiyo iyo kuwa ka soo noqoniyo xarunta waxaa loo diyaarin doonaa qaababka ugu haboon.
- Heerka Daryeelka: Daryeelka caafimaad ee uu kormeerayo Haayada Caafimaadka ee Dadweynaha, taas oo lagu taageriyo dadka waaweyn oo leh astaamaha COVID ama baarista togan. Tani waxaa ka mid ah kalkaalinta aasaasiga ah, la socoshada calaamadaha muhiimka ah, e.t.c. Degmada King ma filayso wax nidaam ah oo ka baxsan daryeelka aasaasiga ah inay ka dhacayaan xaruumaha AC / RC. Ujeedada xarunta waa in kor loogu qaado soo kabashada qofka buka. Qof kasta oo u baahan daryeel culus ama nidaam caafimaad oo lama huraan ah, waxaa la geyn doonaa xarun caafimaad oo dijwaangashan.
- Tijaabinta / Nidaamyada :AC / RCs waxaa loogu talagalay inay wax ka qabtaan baahida boos ku-meel-gaar ah ee la rajeynayo , waxaa loogu talagalay inay dadka tirada badan ee leh astaamaha COVID ama baarista togan ka soo kabtaan cudurka. Baarista loogu talagalay dadka khatarta sare ku sugan Ka sokow, xarun kasta waxay yeelan doontaa meelo gooni ah oo loogu talagalay dadka sugaya natiijooyinka iyo kuwa baarista toogan. Dhammaan falanqaynta sheybaarka waxaa lagu sameyn doonaa meel ka baxsan goobta.